



The Transitional Federal Government of the Somali Republic
Office of the Prime Minister

Ref: XRW/OM/PR 00134/02/12

Date: February 18, 2012

Warsaxaaafadeed

**Shirkii Garowe2 oo caawa saq dhexe la soo gabogabeeeyey iyo madaxda
Soomaalida oo wada saxiixay heshiis**

Garowe February 18, 2012----Shirkii Dastuur u sameynta Soomaaliya ee loogu magac daray Garowe2 isla markaana magaalada Garoowe ka soconayay saddexdii maalmood ee ugu dambaysay ayaa caawa saq dhexe la soo gabogabeeeyey iyada oo lagu gaaray heshiis buuxa oo ku aadan Nidaamka dalka lagu dhaqayo, Nooca Baarlamaan ee uu yeelanayo iyo weliba hirgelinta Mabaadidii Garowe.

Xaflad aad u heer sareysa oo caawa ka dhacday xarunta Jaamacadda PSU ayna ka soo qeybgaleen dhamaan madaxda Soomaalida oo uu ugu horeeyo madaxweynaha Dowladda Federaalka Mudane Shariif Sheekh Axmed, Guddoomiyaha Baarlamaankan Mudane Shariif Xasan Sh. Aadan, Ra'iisul Wasaaraha Soomaaliya Dr. Cabdiweli Maxamed Gaas, Madaxweynaha Puntland Dr. Cabdiraxmaan Faroole, Madaxweynaha Galmudug Mudane Maxamed Caalin, iyo hogaamiyaha Ahlusunna Waljamaacadah.

Munaasabada ayaa sidoo kale waxaa goob joog ka ahaa Ambassador Mahiga oo ah ergeyga gaarka ah ee xoghayaha guud ee Q/midoobay, Wasiirka Awqafta iyo arriimaha Diinta ee Dowladda Jabuuti Mudane Xaamud Suldaan, kuxigeenka Ambassadorka midowga Afrika ee Soomaaliya Hon. Wafula Wmanyiyi iyo ergooyin kale oo matalaysay beesha caalamka.

Madaxweynaha Puntland Dr. Faroole oo ugu horeyntii munaasabada ka hadlay ayaa ku tilmaamay heshiis taariikhi ah oo ay wada gaareen madaxda Soomaaliyeed, wuxuuna xusay in ay jireen caqabado fara badan balse alle mahadiis markii dambe looga gudbay is faham iyo is qancin, isaga oo si gaar ahna u xusay in heshiiskani uu yahay mid u qalma masiirka ummadda Soomaaliyeed.

Sidoo kale, Ambassador Mahiga oo goobta ka hadlay ayaa ku bilaabay hadaladiisa "Wey hagaagtay, waana la guuleystay, dhamaanteena waxaanu nahay kuwo guuleystay" ayuu si kaftan ah u yiri wuxuuna dhanka kale dadweynaha u sheegay in markii la saxiixay heshiiskan uu durba la xiriiray xoghayaha guud ee Q/midoobay Bankimoon uuna u sheegay in Soomaalidu heshiisay.

"Markii aan u sheegay Bankimoon in la heshiiyay, wuxuu igu yiri waa arrin wanaagsan, hadda ayaana u sheegayaa adduunka oo dhan" ayuu mar kale yiri isaga oo xusay in sidoo kale uu ku wargeliyay heshiiskan Mr. Jing Ping oo ah guddoomniyaha midowga Afrika.

Madaxweyne Shariif oo isna ka hadlay heshiiska caawa ayaa ku tilmaamay mid taariikhi ah oo umadda Soomaaliyeed kuwa gudaha iyo kuwa dibaddaba ay ku farxi doonaan.

Dhanka kale, dhamaan madaxda Soomaaliyeed waxay dadweynaha hortooda ku saxiixeen heshiiska, waxaana xusid mudan in heshiiskan uu kaga duwan yahay heshiisyadii hore marka laga tago in gudaha dalka Soomaaliya uu ka dhacay, haddana waxaa la saxiixay caawa saqda dhexe abaara 12:00 ama, waxaana ugu dambeyn xafladu ay soo gabogabowday 01:00 pm. ---- DHAMAAD-----